| | | |
|---|---|---|
| | **Buugga Siyaasadda iyo Nidaamka Booliska ee Waaxda Booliiska Minneapolis** | Number: 7-3000 |

**Mujalladda 7aad – Hawlgallada goobta**

**Is-dhexgalka Shakhsiyaadka Kala-guurka ah iyo Jinsiga ee aan waafaqsanayn jinsiga**

## 7-3001 Sida loola dhaqmayo Skakhsiyaadka sida Kuwa jinsigooda runta ah ka guuraya iyo Jinsiga (gender) aan Waafaqsanayn Jinsinimadda.

(06/16/16)

(A-D)

### I. Ujeedo

Ujeedada sharcigan waa in la dejiyo habraacyada ku habboon daawaynta saxda ah ee jinsiga iyo shakhsiyaadka aan jinsiga (gender) waafaqsanayn (TGN) ee la xiriira Waaxda Booliska Minneapolis.

### II. Sharciga/Xeerka

Waxay noqon doontaa sharciga waaxdan in dhammaan shakhsiyaadka loola dhaqmo si xushmad iyo karaamo ku dheehan tahay qof kasta. Shaqaaluhu waa inay u dhaqmaan, una hadlaan si xirfadaysan, iyagoo aqoonsanaya waajibaadka ka saaran ilaalinta nafta iyo hantida. Shaqaaluhu waa inay dhawraan asluubta, hab-dhaqan xirfadeed dhammaan xiriirada ay la leeyihiin dadweynaha, mana muujin karaan eex ama takoor ka dhan ah shakhsiga TGN ama koox ka mid ah shakhsiyaadka TGN.

### III. Qeexitaanno

**Magaca la qaatay/ama la doortay:** Magaca uusan ku dhalan ee shakhsiga TGN u isticmaalo isa-sifaynta qofeed (kani way noqon kartaa ama ma noqon karto magaca sharciga ee shakhsiga).

**Aqoonsiga Jinsiga** (gender) **ama Muujinta:** Qofka dhabta ah ama la dareemayo muuqiisa ama aqoonsigiisa sida ka muuqata labiska, muuqaalka, dhaqanka, hadalka ama sifooyinka la midka ah, ha ahaato ama aan dhaqan ahaan lala xiriirin habdhiska jir ahaaneed ee qofka, jinsiga uu ka kooban yahay ee koromosoomyada, ama jinsiga dhalashada.

**Jinsiga** (gender) **aan Cadayn:** Eray bixinta shaqsiyaadka ismuujinta jinsigu uusan ahayn hab-dhaqanka laga fili karo rag ama jinsiga dumarka.

**Jinsiga (sex):** Tayada qaab-dhismeedka ee go'aamiya in qof yahay lab ama dhedig.

**Dareenka Galmada:** Waa Ahaanshaha ama sida loo arko in uu uqaadayo shucuur, jireed, ama xiriir galmo qof kale iyada oo aan loo eegin jinsiga (gender) qofkaas ama ahaanshaha ama loo arko in uu leeyahay jihayn la xiriirta arintan.

**Shakhsi ka guuraya jinsigiisii**: Qofka muujiya jinsi dhaqameed ka duwan jinsiga qofkaas lagu tilmaamay waqtigii dhalashada.

**Dheddig-ilaa-Lab (FTM):** Qof dheddig uga guuraya lab-ka, macnaheedu waa qof dumar lagu tilmaamay markii uu dhashay, laakiin isu muujinaya una nool sida lab (sidoo kale loo yaqaan nin is badellay). Shakhsiga FTM-gu waa in loogu yeeraa iyadoo la adeegsanayo magac-u-yaalka ragga (tusaale, isaga, isla-isaga, laftiisa), iyada oo aan loo eegin heerka qalliinka.

**Lab-ilaa-Dumar (MTF):** Qof lab uga guuraya dhedig, macneheedu waa qof lab lagu tilmaamay markii uu dhashay, laakiin isu muujinaya una nool sida dheddiga (sidoo kale loo yaqaan haweeney is-bedeshay). Shakhsiga MTF-ka waa in loogu yeeraa iyada oo la adeegsanayo magac-u-yaal dhedig (tusaale, iyada,isla-iyada, lafteeda), iyada oo aan loo eegin xaaladda qalliinka.

## IV. Habraacyada/Xeerarka/Joogteymaha

### A. Foomamka Cinwaanka A.

1. Shaqaaluhu waa inay shakhsiyaadka TGN-ka kula hadlaan magaca uu qaatay, xataa haddii aanu shakhsigu helin aqoonsi sharci ah magaca la qaatay.

2. Marka laga hadlayo ama laga doodayo shaqsi TGN-ka ah, shaqaaluhu waa inay adeegsadaan magac-u-yaalka ku habboon qofkaas aqoonsigiisa jinsi (tusaale, iyada/lafteeda/teeda, isaga/laftiisa/tiisa, iyaga/laftooda/tooda, iwm.). Haddii shaqaaluhu aanu hubin magac-u-yaalka ku habboon, shaqaaluhu waa inuu si xushmad leh u weydiiyaa shakhsiga.

3. Shaqaaluhu waa in aanay isticmaalin luuqad uu qof caqli-gal ahi u qaadan karo wax-yasid ama sharaf dhac; gaar ahaan, luuqadda loogu talagalay qofka dhabta ah ama loo arko aqoonsiga jinsi, muujinta jinsiga (gender) ama dareenka galmada.

4. Shaqaaluhu waa in aanay usoo bandhigin shaqsigga TGN-giisa aqoonsi qof kale ama koox u maqan ujeeddo sharci fulineed.

### B. Wacitaanka Adeegga

1. Wicitaannada adeegga ama cabashooyinka ay keenaan shakhsiyaadka TGN-gu waa in wax laga qabtaa oo loo baaro si waafaqsan dhammaan waaxyada sharciyadda.

2. Shaqaaluhu waa in aanay u tixgelin jinsiga qofka ama aqoonsiga jinsiga sida tuhun macquul ah ama caddaynta ugu horraysa ee ah in shakhsigu uu ku kacay ama uu galay fal dambiyeed, oo ay ku jirto dhillaysi.

    **a.** Shaqaaluhu waxay tixgelin karaan oo kaliya jinsiga ama aqoonsiga jinsiga si waafaqsan Sharciga Booliska ee dhexdhexaadka ah (P/P 5-104).

## C. Gaadiidka

Mar kasta oo ay suurtogal tahay, tuhmanaha TGN-ka ama shaqsiga la xiray waa in keligiis la qaadaa. Saraakiishu waa inay xaqiijiyaan in la soo wacay unugyo dheeraad ah si ay gacan uga geystaan qaadista shakhsiyaadka TGN dheeraadka ah.

## D. Raadinta

1. Saraakiishu waa in aanay joojin, xirin, fatashin, ama aanay baarin qofka gebi ahaan ama qayb ahaan ujeeddooyinka lagu go'aaminayo jinsiga (gender) qofkaas ama si loogu jeediyo qofka dareenkiisa jinsi.

2. Saraakiishu waa inay raacaan hab-dhaqanka u degan iyo hab-raaciisa marka ay qaadayaan waraysiyadda, Terry wuu joojiyey wuuna fatashay/baaray.

3. Mar kasta oo ay suurtagal tahay, baaritaanka tuhmanaha TGN-ka ee dhaafsiisan fatashaada/baaridda waa in uu sameeyaa sarkaalka jinsiga (gender) ee uu codsaday tuhmanuhu.

    **a.** Dhammaan dhinacyada kale ee raadinta waa in loo fuliyaa si waafaqsan hab-dhaqanka iyo hab-raacyadda MPD-da u degsan

## E. Adeegyada caafimaadka

1. Shakhsiyaadka TGN-ka ee u baahan daryeel caafimaad waa in loola dhaqmaa sida qof kasta oo kale oo u baahan daryeel caafimaad.

## F. Magaca iyo Qoondaynta Jinsiga (gender) ee Shakhsiyaadka TGN-ka ee Ujeedooyinka Xogta

1. Nidaamka warbixinta ee ay isticmaasho MPD (CAPRS) waxay isticmaashaa summada "jinsi" waxayna bixisaa ikhtiyaarrada "Lab" iyo "Dumar." Qaybtani waxay adeegsan doontaa ereyga "jinsi" (gender) iyadoo tixraacaysa kala soocida nidaamka warbixinta.

2. Magaca iyo jinsiga qofka waxaa loo kala saarayaa ujeeddooyin xog ahaaneed sida uu uga muuqdo kaarka aqoonsiga ee dowladdu bixisay.

3. Haddii ay dhacdo in kaarka aqoonsiga ee dawladdu bixiso aanu la heli karin:

    **a.** Haddii sarkaalku aqoonsi ku sameeyay xog-ururin ku habboon (sida DVS) ama haddii shakhsiga lagu aqoonsaday xabsiga Hennepin County, magaca iyo jinsiga (gender) ka soo jeeda aqoonsigaas waa la isticmaalayaa.

    **b.** Haddii aan la samayn aqoonsi dawladeed habkan soo socda waa in la isticmaalaa:

**i.** Sarkaalku waa inuu si xushmad leh u weydiiyaa shakhsiga inay aad ugu dhow yihiin lab ama dheddig iyo inay taas u isticmaalaan soocidda xogta warbixinta CAPRS.

**aa.**. Haddii shakhsigu aanu ku qanacsanayn labada ikhtiyaar ama uu diido inuu ka jawaabo, sarkaalku waa inuu doortaa mid.

**ii**. Sarkaalku waa inuu qofka waydiiyaa magaciisa sharciga ah si uu u isticmaalo warbixinta.

4. Haddii ay jirto hubanti la'aan ku saabsan gelitaanka xogta ku habboon ee magaca ama jinsiga qofka, kormeere waa in lala tashadaa hagitaan dheeraad ah.

5. Qaybtani waxa ay la xidhiidhaa kala soocidda xogta oo keliya, mana beddeli doonto gaadiidka, raadinta ama habaynta shakhsiyaadka.